

# Isku xirka casri ah ee bulshada soo koreysa

## La falgalidda bulshada waa aas-aaska go'aan qaadashada

Fadlalgid dhameystiran oo loo dhanyahay ayaa aas-aas u ah go'aan ka gaaridda Barnaamijka Bedelidda Buundada Intestate. Waxaan baadi goobeynaa xal muhiimad siinaya badbaadada, ka turjumaaya qiyamka bulshada, soo bandhigaaya tabashada bulshada, kordhinaayana taageerada guud ee gobolka. Wada hadalo balaaran, loo dhanyahay, joojtana ah oo bulshada dhex mara ayaa muhiim u ah si loo meel mariyo xalka ugu haboon ee buundada loogu heli karo baahiyaha adag ee ay qabaan bulshooyinka kunool gobolada Oregon iyo Washington

## Sedex koox oo kala duwan oo ka imaanaaya bulshada ayaa hogi doona go'aanka barnaamijka

Si taageero loogu helo hadafyadaan, barnaamijka wuxuu diyaariyay sedex koox latalin si ay u keenaan falcelinta iyo talooyinka dadweynaha: Kooxda Fulinta, Kooxda la talinta Cadaaladda, iyo kooxda la talinta Dadweynaha



### Hadafyada ugu waaweyn ee la falgalidda bulshada

- ▶ Raadinta jawaabo kala duwan oo laga keenaya daneeyayaasha barnaamijkaan
- ▶ Kusoo daridda dadka aan matalaadda helin iyo/ama dadka dadka la liido
- ▶ Isku duwidda hal abuurka
- ▶ Yareynta waxyaabaha hor istaagaya lafalgalidda bulshada
- ▶ Muujinta isla xisaabtanka ayadoo la adeegsanaayo daah furnaan iyo falcelin
- ▶ Abuuridda jawi kalsooni iyo aaminaad ka dhexeysa daneeyayaasha iyo bulshada
- ▶ Bixinta fursado wax ku ool ah oo qaabeysa shaqada barnaamijka

### Kooxda Fulinta :

Kooxda fulinta ESG waa koox ka kooban 12 xubnood oo hogaaminaya talooyinka gobolka laga soo jeediyo ee ku aadan barnaamijyada ugu waaweyn ee bulshada muhiimka u ah. Xubnaha kooxdaan waxay ka kooban yihiin 10 ka kala yimid wakaaladaha labada gobol, iyo labo wakiil bulsho oo xubin ka ah gudiga latalinta bulshada

### Kooxda la talinta Bulshada:

Kooxda la talinta bulshada CAG waxay si dheeli tiran u matalaan bulshooyinka labada magaalo ee Portland, Oregon iyo Vancouver, Washington. Kooxda la talinta bulshada waxay bixin doontaa talooyin ku aadan barnaamijka IBR si ay hubaal u noqoto in waxyaabaha kasoo baxaaya barnaamijkaan uu yahay wax ay bulshadu u baahantahay, waxyaabaha ay tabaayaan iyo waxyaabaha ay ka cabanaayaan

### Kooxda la talinta Cadaaladda:

Kooxda la talinta cadaaladda waxay gacan ka geysan doontaa in barnaamijka IBR ahaado mid cadaalad ku dhisan. Kooxda waxay talooyin siin doontaa hogaanka sare ee barnaamijka IBR, talooyinkaas oo ku saabsanaan doona habsami u socodka, siyaasadaha iyo go'aamada laga yaabo inay saameeyaan bulshooyinka taariikh ahaan aan matalaadda helin ama kuwa la quursado

**Koox walba waxay haddeer bishiiba mar ama labo jeer u kulmaan qaab maqal iyo muuqaal ah oo dadweynahana u furan. Fursadaha ay dadka ra'yigooda ku dhiiban karaan waxay furan yihiin shirka kahor, inta uu shirka socdo, iyo markii uu shirka dhamaado kadib**

Ujeedada iyo Baahida  
Aragtida iyo Qiyamka  
(Xiliga Guga)

Shuruudaha Baaritaanka iyo  
Waxyaabaha hore ee lagu bedeli  
karo (Xiliga Xagaaga/dayr)

Kala duwanaansho  
ciriiri ah oo bedel  
noqon kara (xiliga  
Dayrta/liilaalka)

Deegaanka iyo naqshadda  
Shaqada iyo Dhismaha  
(2020-2025)



## La falgalidda bulshada



Dhacdooyinka La falgalidda  
(February)



Dhacdooyinka La falgalidda  
(Xiliga Xagaaga)



Dhacdooyinka La falgalidda  
(Xiliga Dayrta)

## 2021 La falgalidda iyo fursadaha warbixin

- ▶ Kulamo dadweyne oo Maqal iyo Muuqaal ah: Gudiyada kala ah ESG, CAG, iyo EAG waxay u kulmaayaan si bille ah ama bishiiba labo jeer inta lagu jiro sanadka 2021
- ▶ Shirar Furan oo Qadka lagu qabanaayo: Kulamadaan waxay dhici doonaan markii lagaaro hadafyada waaweyn
- ▶ Sheekada Bulshada: Sheekada bulshada waxay barnaamijkeena ka caawineysaa inuu dhoco wada sheekeysii labo dhinac ah, wuxuu bixin doonaa warbixin dhameys tiran oo ku saabsan barnaamijka, wuxuu sidoo kale soo aruurin doonaa xogta iyo jawaabaha ay bixiyaan dadka ka qeyb qaata barnaamijka
- ▶ U waramidda Bulshada: Bulshada waa loo warami doonaa inta lagu guda jiro sanadka 2021. fadlan la xiriir barnaamijka si aad u balansato ururkaaga ama kooxda bulshada ee aad ka tirsantahay
- ▶ Sheeko Lagu Sheego Qaab Muuqaal ah: Sheekada qaabka muuqaalka ah loo sheegon waxay dhici doontaa inta uu sanadkaan socod, dadweynahana way la socan karaan xogta ah goorta muuqaal cusub lasoo gelin doono ayagoo iska diiwaan gelinaaya barnaamijka, ama ayagoo nagala socanaaya YouTube,
- ▶ Sheeko Lagu Sheego Qaab Muuqaal ah: Sheekada qaabka muuqaalka ah loo sheegon waxay dhici doontaa inta uu sanadkaan socod, dadweynahana way la socan karaan xogta ah goorta muuqaal cusub lasoo gelin doono ayagoo iska diiwaan gelinaaya barnaamijka, ama ayagoo nagala socanaaya YouTube, Facebook, Twitter iyo Instagram
- ▶ Baahinta Musalsalo: Waxaa la baahin doonaa sanadka bartamihiiisa
- ▶ Xayeysiin daawacan ama Sawir ah: Xayeysiinta waxaa loo isticmaali doonaa si ay kor ugu qaado dhacdooyinka barnaamijka iyo fursadihiisa markii lagaaro hadafyada ugu waaweyn

## Si fiican noola socda

### KULAN QADKA AH OO DADWEYNAHA U FURAN, SAHANKA BULSHADA & ISU WARAMIDDA

- ▶ February 16 – March 1  
[www.interstatebridge.org/calendar](http://www.interstatebridge.org/calendar)

### BOOQO WEBSITE KEENA

- ▶ [www.interstatebridge.org](http://www.interstatebridge.org) si aad waxbadan uga ogaato, iska diiwaan geli Joornaalkeena qadka, ama faalo kasoo dhiibo

### TALOoyIN BIXI

- ▶ Noogu soo dir E-mail kaaga [info@interstatebridge.org](mailto:info@interstatebridge.org)
- ▶ Soo wac Xafiiska Barnaamijkeena
  - 360-859-0494 (Washington) | 503-897-9218 (Oregon)
  - 888-503-6735 (toll-free)

### NAGALA SOCO



### OREGON

Dadka lexaadkooda dhameystirneen (A ama Ciwaanka Xuquuqda aadanaha ee Haddii aad u baahato adeegyo turjuma ama faahfaahin kaloo dheeri ah fadlan wac 503-731-4128, TTY 800-735-2900 an Adeegga Isgaarsiinta Oregon 7-1-1.

### WASHINGTON

Codsiyada ay soo gudbinaayaan dadka uusan lexaadkooda dhameystirneen ee ku nool Washington waxaa lagu diri karaa ayadoo lala xiriiraayo WSDOT Diversity/ADA Kooxda u qaabilsan [wsdotada@wsdot.wa.gov](mailto:wsdotada@wsdot.wa.gov) ama wac telefoonka bilaashka ah , 855-362-4ADA (4232). Dadka dhagoolka ah ama dhegaha kajiga codsi wey diirsan karaan ayagoo wacaayo adeega isgaarsiinta ee washington 711. Qof walboo ainsan in xaqiisa/xaqeeda ciwaanka VI lagu xadgudbay wuxuu dacwo ka xareyn karaa WSDOT's Office of Equal Opportunity (OEO) Title VI Agaasimaha asagoo kale xiriiraaya (360) 705-7090.